

Sidatan ayaa Gobolka Jämtland Härjedalen tallaalka looga ballansada

Siyaabo kala duwan ayaa tallaalka ku ballansan kartaa, sida adigoo guda-galo barta internetka 1177.se ama adigoo garaaco lambar taleefan oo ballansashada u gaar ah. Sidii aad ballanka tallaalka ku qabsato dartiisa waa inaad haysato lambar taleefan dalka Iswiidan iyo aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaanno [e-legitimation]. Kaddib marii aad guda gasho barta internetka 1177.se waxaa ku soo ifbixi doono ereyo af-iswiidish ku qoran.

Haddii aadan haysan Tobbanka lambar aqoonsiga dalka Iswiidan ama aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaanno [e-legitimation], waxad garaaci kartaa lambar taleefan u gaar ah sidii aad ballanka tallaalka ku qabsato dartiisa. Lambarka gaarka waa 063-14 22 50.

Haddii af-iswiidishka aadan garanayn waxaad xaq ku lahaan kartaa in afkaa hooyo lagugu turjummo sidii warbixin ku hesho oona tallaalka ku ballansato. Markii khadka taleefanka aad kula xiriirto waa inaad wigeliso in ballan-qabsashada tallaalka darteeda turjubaan u baahan tahay. Sidoo kale u sheeg luqadda aad ku hadasho. Xaaladdaas waxay shaqaalaha isku day doonaan in ay ku helaan qof turjubaan oo wadahaadalka ka qaybgalo. Haddii adeegga turjubaanka aadan ku codsan karin af-iswiidish ama af-ingriisi waxaad qof ka codsan kartaa in uu arrinta ka caawinno.

Iyadoo la isticmaalayo barta internetka 1177.se ayaa sidatan ballamada loo qabsan karaa

- [Xulo rugta daryeel-caafimaadeedka](#) kaddib jag-sii. Awoodda xulashada rugta daryeel-caafimaadeedka adiga iskaleh.
- Jag-sii isku-xireha *Boka tid för vaccination mot covid-19* ee ku hoos yaallo hoosta cinwaanka *Våra e-tjänster*.
- Ku qor Tobbanka lambar aqoonsiga ee adiga ku gaarka ah, kaddib xulo nooca aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaanno [e-legitimation] ee doonayso inaad ku guda gasho.
- Aqriso warbixinta ku qoran kaddib hubso inaad gebi ahaan fahantay waxa ku qoran. Kaddib jag-sii ereyga *Fortsätt*. Kaddib waxaa ku soo if-bixi doono bog ku qoran su'aallo kuwaasoo kaaga baahan jawaabtooda. Kaddib markii su'aallaha aad ka jawaabto Jag-sii ereyga *Nästa*.
- Kaddib jag-sii ereyda *Boka tid* waa haddii aad ka tirsan tahay kooxaha imminka loo oggol yahay ballan-qabsashada tallaalka.

Markaas kaddib ayaa isha ku dhufan doontaa saacadaha aad ballansan karto.

- Kaddib markii ballansashada aad dhamayso waxaa lagu soo diri doonaa xaqiijinta ballanka. Taasoo ku qoran goobta aad iska tallaali doonto.

Adigoo isticmaalayo khadka taleefanka ayaa sidatan ballanka tallaalka loo qabsada

Wac lambarkaan 063-14 22 50. Kaddib waxaa shaashada kaaga soo ifbixi doono tilmaan-bixin ku saabsan qaabka tallaalka loo ballansado.

Lambarka taleefanka 063-14 22 50 waxaa looga talagalay oo keliya in tallaalka lagu ballansado. Suurtagal ma noqon karto inaad su'aallo ku saabsan cudurka [Covid-19] waydiiso. Jawaabta su'aallaha ku saabsan cudurka [Covid-19] waxaad ka aqrisan kartaa barta internetka 1177.se ama khadka taleefanka 1177. Laakin khadka taleefanka 1177 kama ballansan kartid tallaalka. Sidoo kale suurtagal ma noqon karto inaad ballan-qabsasho darteed khadka taleefanka kula xiriirto rugta daryeel-caafimaadeedka.

Haddii ballanka aad qabsatay ka faa'iidaysan karin

Haddii aad xannuunsan tahay ama aad dareemayso calaamadaha cudurka [Covid-19] laguma oggola inaad is-tallaalsho. Xaaladdaas waa inaad ciribtirto ballankii aad qabsatay, kaddib iska qaad shaybaar sida loo hubsado in u cudurka kugu dhacay iyo in kale.

Ballankii aad khadka taleefanka ku qabsatay sidatan ayaa loo ciribtira:

- Wac 063-14 22 50 kaddib xulo *Avboka tid*.
- Sheeg magacaaga, tobanka lambar aqoonsiga iyo ballanka aad doonayso inaad ciribtirto.
- Kaddib wac isla lambarka 063-14 22 50 kaddib ballan cusub qabso oo goor dambe ah.

Markii lambarka aad wacdo warbixinta oo idil oo aad maqli doonto waa af-iswiidish. Markii aad ballan cusub qabsanayso wargeli haddii qof turjubaan ah u baahan tahay. Sidoo kale sheeg luqadda aad ku hadasho.

Haddii barta internetka 1177.se aad ballanka ku qabsatay sidatan ayaa u ciribtiri kartaa:

- Adigoo isticmaalayo aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaanno [e-legitimation] guda-gal barta internetka 1177.se.

Kaddib marii aad guda gasho barta internetka waxaa ku soo ifbixi doono ereyo af-iswiidish ku qoran.

- U gudub halka ereyada *Bokade tider* ku qoran yihiin. Waxaa halkaas kaaga soo ifbixi doono saacadda aad tallaalka ballansatay. Jag-sii saacadda aad ballansatay sidii aad u ciribtirto awgeed.